




Aargoosigii shimbir-malabka
La revanche de l'indicateur



Zulu folktales
 Wiehan de Jager
 Anwar Mohamed Dirie
 Somali / French
 Level 4

(imageless edition)



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Aargoosigii shimbir-malabka / La revanche
de l'indicateur


Written by: Zulu folktales

Illustrated by: Wiehan de Jager

Translated by: (so) Anwar Mohamed Dirie, (fr)

Alexandra Danahy

This story originates from the African Storybook
(africanstorybook.org) and is brought to you by
Storybooks Canada in an effort to provide
children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 3.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0).


<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0>



Tani waa sheekada Ngede, shimbir-malabka, iyo nin yar oo dhuuni ah laguna magacaabay Gingile. Maalin goor uu Gingile ugaarsi tagay maqlay ci'da Ngede. Gingile afkiisa ayaa bilaabay in uu dhareero niyeysiga malab dartii. Wuu istaagay wuu na dhagaystay si taxadar ah, oo uu raadiyay ilaa uu arkay shimbirkii oo laamaha korka madaxiisa ku jiro. "Jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku shanqaray shimbiarki yaraa, isaga oo u duulay geedka ku xigo, hadana kan kale. "jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku ciyay, istaagayana marba mar si uu u hubsado in uu Gingile soo raacay.

...

Voici l'histoire de Ngede l'indicateur et un jeune homme avide nommé Gingile. Un jour, lorsqu'il chassait, Gingile entendit l'appel de Ngede. Gingile commença à saliver en pensant au miel. Il arrêta et écouta attentivement, fouillant jusqu'à ce qu'il trouve l'oiseau dans les branches au-dessus de sa tête. « Chitik-chitik-chitik, » le petit oiseau ébranla, en volant d'un arbre à l'autre. « Chitik-chitik-chitik, » il lança, arrêtant de temps en temps pour s'assurer que Gingile le suivait.



Saacad barkeed ka dib, waxa ay soo gaareen geed berde duur baaxad le. Ngede waxa uu si waalli ah ugu

boodbooday laamihii geedka. Dabadeedna waxa uu dul dagay mid ka mid ah laamihii, waxa uu na madaxiisa ku

soo leexiyay Gingile sidii in la dhahayo, "Waa kan! Kaalay hada! Maxaa waqtigaas dheer u qaadanaysaa?" Gingile kama usan arki karayn wax shinni ah geedka hoostiisa,

laakiin waxa uu aaminay Ngede.

...

Après une heure et demie, ils atteignirent un figuier

sauvage énorme. Ngede sautilla éperdument parmi les branches. Il s'installa ensuite sur une branche et inclina sa tête vers Gingile comme pour dire, « Le voici ! Viens vite ! Qu'est-ce qui te prend autant de temps ? » Gingile


ne pouvait pas voir d'abeilles du dessous de l'arbre, mais il avait confiance en Ngede.



Gingile waxa uu warrankii ugaarsiga dhigtay geedka hoostiisa, waxa uu soo aruursaday xaabo, dab ayuuna shiday. Markii uu dabkii si fiican u shidmay, qori dheer oo qallalan ayuu dabkii galiyay. Qorigani waxuu khaasatan caan ku ahaa in uu sameeyo qiiq badan marka la shido. Waxa uu bilaabay fuullidii, isaga oo ilkaha ku haya dhanka qaboow ee qoriga qiiqaya.

...


Alors, Gingile déposa sa lance sous l'arbre, recueilli des brindilles séchées et alluma un petit feu. Un coup que le feu brûlait bien, il mit une longue branche au cœur du feu. Ce bois était connu pour la fumée qu'il créait quand il brûlait. Gingile commença à grimper, tenant entre ses dents le bout froid de la branche qui fumait.



Markiiba waxa uu maqli karay "sss-sss" da dheer ee shinnida mashquusan. Waxa ay ka galeysey kana soo baxaysay shinnidu meel dulleesha oo geedka jiriddiisa ah - hoygeeda. Markii uu Gingile gaaray hoygii shinnida waxa uu qorigi qiiqayay ku riixay meeshii dulleeshay. Shinnidii banaanaka ayay u yaacday, sababtoo ah ma jeclayn qiiqa - laakin intaa ka hor waxay Gingile siiyeen xoogaa qaniinyo kuulii!

...


Bientôt il pouvait entendre le bourdonnement bruyant des abeilles chargées. Elles rentraient et sortaient d'un creux dans le tronc d'arbre - leur ruche. Lorsque Gingile rejoint la ruche il mit le bout fumant de la branche dans le creux. Les abeilles sortirent, fâchées et méchantes. Elles s'envolèrent parce qu'elles n'aimaient pas la fumée - mais pas avant d'avoir donné des piqures douloureuses à Gingile !



Sidaa darteed, marki! Gingile ay carruurtiisa maqlaan sheekada Ngede waxa ay ixtiraam u qaadaan shimbirka yar. Mar walba oo ay malab soo gurtaan, waxa ay xaqiijiyaan in ay qeybta ugu weyn xabad barsheedka uga tagaan shimbir malabka!

...


Ainsi, quand les enfants de Gingile entendent l'histoire de Ngede ils respectent le petit oiseau. Chaque fois qu'ils récoltent du miel, ils s'assurent de laisser la plus grande partie du rayon pour l'indicateur !



Markii ay shinnidii tagtay, Gingile waxa uu gacantiisa ku riixay buulki malabku ku jiray. Waxa uu kala soo baxay gacan buuxdo xabag-barsheed, tiftifqayso malab iyo diirdiir cadcad oo buudhan. Waxa uu si taxaddar leh ugu riday xabag-barsheedkii kiish uu garabka ku sitay, geedkiina waa uu ka soo degay.

...


Quand les abeilles furent sorties, Gingile enfonça ses mains dans le nid. Il sortit des poignées du nid desquelles s'écoulaient du miel riche et des larves grasses et blanches. Il mit le nid soigneusement dans la besace il portait sur son épaule et commença à descendre de l'arbre.



Intii ay haramcaddu weerarin Gingile, si degdeg ayuu hoos uga degay geedki. Degdegii awgii ayuu laan gafay, waxa uu si shanqar culus leh ugu dhacay dhulka oo wareejiyay canqowgiisi. Sidii ugu dhakhsaha badneyd ee uu karay ayuu u dhutiyay. Nasiib lahaayaa, haramcaddu aad bay weli u sii hurdeysnayd haday cayrsan lahayd. Ngede, Shimbir-malabkii, wuu helay aargoosigi. Gingile na cashar ayuu bartay.

...


Avant que Léopard puisse s'en prendre à Gingile, ce dernier se précipita en bas de l'arbre. Dans son empressement, il manqua une branche et atterrit par terre avec un bruit sourd, tordant sa cheville. Heureusement pour lui, Léopard était encore trop endormi pour le poursuivre. Ngede, l'indicateur, eu sa revanche. Et Gingile retint sa leçon.



Ngede waxa uu si xiiso leh u daawanayay wax walba oo uu Gingile sameynayey. Waxa uu sugayay in uu uga tago cad xabag-barsheed buurran ah Shimbir-malabka si mahad celin ah. Ngede laanba laan ayuu uga duulay, ugu na sii dhawaanayay dhulka. Ugu dambeyn Gingile geedka salkiisi ayuu gaadhay. Ngede dhagax u dhow wiilka ayuu dul istaagay waxuu na suggay

...


Ngede regardait avec impatience tout ce que Gingile faisait. Il attendait qu'il laisse un gros morceau de nid d'abeille comme signe de remerciement pour l'indicateur. Ngede voltigeait de branche en branche, de plus en plus près du sol. Finalement, Gingile arriva au pied de l'arbre. Ngede se percha sur une roche près du garçon et attendit sa récompense.



Gingile wuu fuulay, la yaabbanaa sababta uu u maqii waayay "Sss-sss-sss" di caadiga ahayd. "Malahaha godku gudaha geedka ayuu sii jiraa," ayuu ku fikiray. Laan kale ayuu kor usii fuulay. Laakiin halkii godkii shinnida eegii lahaa, waxa uu indhaha ku dhufay haramcad! Haramcaddu aad bay uga carootay in hurdaeedii si edeb darro ah looga dhexgalay. Indhaha ayay isku kuduudday, afkeedana way kala qaaday iyada oo ilkheeda waaweyn ee afka badan dibedda u soo saaraysa.

...


Gingile grimpa, se demandant pourquoi il n'entendait pas le bourdonnement habituel. « Peut-être que la roche est très profonde dans l'arbre, » se dit-il. Il se remonta sur une autre branche. Mais au lieu de la roche, il arriva face-à-face avec le visage d'un léopard ! Léopard était très fâché que son sommeil ait été interrompu si brusquement. Elle plissa ses yeux et ouvrit sa bouche pour révéler ses grandes dents pointues.



Laakiin, Gingile dabkii ayuu damiyey, warrankiisii na qaatay oo socodkii gurigiisa billaabay, isaga oo inkiraya shimbirki. Ngede si carro leh ayuu u ciyey, “Fiiq-fifiq-fiifiiq!” Gingile inta istaagay, oo shimbirki yaraa eegay ayuu aad ugu qoslay. “Waxa aad rabtaa xoogaa malab ah, ma rabtaa, saaxiib? Ha! Laakiin hawsha oo dhan aniga ayaa qabtay, aniga ayaana qaatay qaniyo oo idil. Maxaan kuula qaybsadaa malabkan la jecelyahay?” Dabadeedna wuu iska dhaqaaqay. Ngede aad ayuu u carooday! Ma ay ahayn in sidan loola dhaqmo! Lakiin wuu aargoosan doonaa!

...

Mais Gingile éteint le feu, ramassa sa lance et commença à rentrer chez lui, en ignorant l’oiseau. Ngede lança, fâché, « VIC-torr ! VIC-torr ! » Gingile arrêta, devisagea le petit oiseau et éclata de rire. « Tu veux du miel, mon ami ? Ha ! Mais c’est moi qui ai fait tout le travail et reçu toutes les piqûres. Pourquoi est-ce que je devrais partager ce miel avec toi ? » Et il quitta. Ngede était furieux ! Cela n’était aucune manière de le traiter ! Mais il aurait sa revanche.



Asbuucyo badan kadib, maalin, markale ayuu Gingile maqlay ci’da malab sheega ee Ngede. Waxa uu xusuustay malabkii macaanaa, si xiiso leh na u dabagalay shimbirkii mar kale. Sidii uu kaynta dhinaceeda ugu horkacayey Gingile, Ngede waxuu dul istaagay geed weyn oo qodxo dallad ah leh si uu ugu nasto. “Ahh,” Gingile ayaa ku fikiray. “Godka shinnida geedkan un buu ku yaal.” dhaqso ba waxuu samaystay dabkii si yaraa waxa uuna bilaabay in uu fuulo, laanti yarayd ee qiiqeysayna ilkaha ku sita. Ngede wuu fariistay oo iska daawaday.

...

Un jour, plusieurs semaines plus tard, Gingile entendit de nouveau l’appel de Ngede. Il se souvint du miel délicieux et suivi avec impatience l’oiseau une fois de plus. Après avoir mené Gingile le long de la forêt, Ngede arrêta pour se reposer dans un acacia faux-gommier. « Ahh, » pensa Gingile. « La ruche doit être dans cet arbre. » Il parti rapidement son petit feu et commença à grimper, la branche fumante entre ses dents. Ngede, assis, le regardait.